



Waalidiinta Raja Sare ka leh Waxbarashada Ilmahooda

Ka caawi ilmahaada Waxbarashada Waqtiga Dugsiga ka-dib iyo Barnaamijka Xilliga Dugsigu Xiran yahay

(Help Your Child Learn with After-school and Summer Programs - Somali)

Xirfadda waxbarashada ilmaha ee waqtiga dugsiga, waxa saacidi kara waqtiga ay dugsiga dibadiisa ku qataan. Waxad dooran karta waxbarashada dugsiga ka-dib (After school) iyo barnaamijka waqtiga dugsigu xiran yahay (Summer program) ee aad maleyneyso in ilmahaaga cawinad wanaagsan ka helayaan, qoyskana ku haboon. Markad garato waxqabadka barashada dugsiga kadib, sida ay ilmaha u caawiso, iyo sababta uu qiimo weyn u leeyahay, waxaad gaari karta doorka ugu wanaagsan ee saacidaya qof walba.

Barnaami walba ee dugsiga ka-dib wuxu saacidaya ilmahaaga hadu barnaamijka bixinayo kuwan soo socda oo furaha u ah:

- Shaqaaluhu marku waalidka iyo ilmaha la leeyahay xiriir wanaagsan, oo ahmiyad siinayo.
- Ilmahaagu garanayan oo dareemayan nabad iyo xasilooni.
- Barnaamijku ku dhiira gelinayo, kana filayo ilmaha dhaqan masuul-qaad leh.
- Barnaamijku leeyahay maamul munaasab ah, oo dhismo kala dambeyn nabad ah leh.
- Shaqaale howsha mid xiisa leh u muujinaya.
- Shaqaale ilmaha u muujinaya xiriirka ka dhexeeya ficiladda ay barayaan iyo aduunka ku heraarsan; xirfad ahaan ama dhaqan ahaan.
- Bixinaya barnaamijyo ilmahu muddo dheer ka kheyb qaadan kara; hadba waqtiga intuu ka dheer yahay, ayeey faaiidaduna ka xoogan tahay.
- Barnaamij leh yool la doonayo in la gaaro, sida in ilmaha la baro si xasilooni leh in koox ahaan wax u dhageystaan, ama bartaan xirfad kubadda loo ciyaaro, ama xisaabta isku dhufashada.
- Barnaamijku waxu xiriir wanaagsan la leeyahay qoyska, dugsiga iyo jaaliyadda.

Hadii aad ka hesho barnaamijka, ku aamin qab in ilmahaagana barashada dugsiga dibadiisa ay ka caawineyso waxbarashada dugsiga. Waxa baaris lagu ogaaday, ilmaha khibradda u yeesha barnaamijka dugsiga dibadiisa, waxey yeeshaan dhaqan iyo dabeecad wanaag xagga tacliinta. Dhaqan iyo dabeecad wanaag waxey saacidan howsha ilmahu fasalka ku qabtan.

Faa'idooyinka ilmahaaga ka helayaan markey ka kheyb qataan barnaamijyada waqtiga dugsiga ka-dib iyo barnaamijka xilliga dugsigu xiran yahay waxaa ka mid noqon kara:

- Drajo sare iyo imtixaanada
- Horumar dhameystirka howsha
- Dhaqan wanaag iyo fursad sare qalin jebin
- Ka kheyb qaadasho xooggan tacliinta, dugsiga iyo qorsheyn mustaqbalka

Bulshanimada iyo dareenka

- Isku kalsooni, iyo aminaad nafsi
- Walwal iyo isku buuqsanaan yari
- Xiriir wanaag saxiibada, qoyska, iyo macalimiinta

Wanaag iyo caafimad

- Garasho xooggan oo ah caafimadka iyo nafaqo wanaagga
- Door wanaag rashinka ay cunayan, jimicsi, muqaal wanaag, iyo cafimaad guud

Dib-u-xoojin tacliin barashada

Barnaamijyada lagu qabto dugsiga dibadiis, waxey ilmahaaga u masamaxayan fursad xirfad dhis ah, iyago isticmalaya hab madadaala, ciyaar iyo gacma wax ka qabad ah. Habkan waxu dib-u-xoojin ku sameynaya waxyaabaha ay dugsiga ka bartaan, iyado hab ka duwan ah. Ilmahaaga waxey kalo arkayan, oo qibrad u yeelanayan, xirfadaha qaarkood sida xaqiiqada ah ee loo isticmaalo dunida, oo waxey khibrad u yeelanayan waxyaaba aan caadi ahaan dugsiga laga barin.

Xitaa hadi barnaamijku aheyn mid darasa ah, waxu xoojinaya dhaqan wanaagga oo ay guul kaga gaari karan fasalka. Waxey baran karan:

- In xarakaadka adag dul qaad u yeshaan
- Waqtigooda maamulaan
- Karti shaqsiyeed isku filaansho
- La xiriirka dadka waaweyn

Dhaqanadaan iyo dabecadahan oo idil wa kuwa muhiim u ah horumarka fasalka.

S'uaalo

Wax su'aal ah ma ka qabta barnaamijka Waxbarashada Waqtiga Dugsiga ka-dib? Fursadaha doorka degmada dugsigu bixiso waxad kala hadli karta maamulaha ilmahaaga ama macalin. Waxaad soo wici karta Hassan Samantar ee xarunta PACER Center (952) 838-1334, oo waxad codsan karta in uu kala shaqeeyo mashruuca waalidiinta rajada sare ka leh ilmahooda.

Hey'adda PACER wa hey'ad Faa'iido aan u shaqeyn (nonprofit) ee gobolka Minnesota. Waxey saacidaa xuquuqaha waxbarashada caruurta dib u-dhaca leh iyo kuwa aan laheyn. Waxey bixisa tababaro, cawinaad shaqsiyeed, akhbaaro qoraal ah iyo wax sii dheer.